

WARQADDA XAQIIQDA



Waa Maxay Central Corridor?

- Central Corridor waa wado tariin dhererkeeduna yahay 11-mayl oo la maro iskuna xirta Minneapolis illaa dhex bartanka St. Paul iyo University of Minnesota, iyadoo sii marta meelo u dhexeeya ee deegaan iyo ganacsi oo muhiim ah.

Waa maxay nooca tariinka loogu talagalay in uu maro Central Corridor?

- Marin tariin fudud (LRT), sida tariinada hadda mara wadada triinka Hiawatha Line ee Minneapolis.

Sidee Central Corridor uu wax u tarayaa reer Minnesota?

- Shaqaalaha ka sheqeeya inta u dhow Central iyo Hiawatha Corridors — oo uu ku jiro garoonka diyaaraduhu, Mall of America, University of Minnesota iyo St. Paul's Midway — waxay helayaan gaadiid la isku halayn karo oo ay shaqooyinkooda ku tagaan.
- 2030-ka waxaa la saadaalinayaa in todobaad kiiba celcelis 43,000 oo qof ay raaci doonaan LRT.
- Saxmadda baabuurta oo ka yaraanaysa dadka deggan iyo dadka soo booqda Twin Cities-ka.
- Goobaha ganacsiga ee ku yaal Central Corridor waxa faa'iida u ah indhaha badan oo arkaya ganacsigooda iyo horumarka ay wadadu u keenayso.
- Tariinka dadka badan qaadaa wuxuu dhimayaa khatarta qaaca ka baxa baaduurta, taasoo wanaajinaysa tayada hawada.

Waa maxay sababta loogu baahanyahay in Central Corridor isbedel laqu sameeyo?

- 2020-ka, waxaa la filayaa in baabuurta korodho boqol kiiba 48, taasoo keenaysa saxmad weyn.
- Maadaama wadada Interstate 94 ayan haysan dhul ay ku fiddo laguna wado in 2020-ka baabuurta ka badato qaadkeeda, fidin wadada la fidiyaa waxay ku kacaysaa in ka badan \$1 billion, iyadoo burburinaysa xaafadaha u dhow, waxa kaliya oo fidintu traysaana waa in ay uun dib u dhigto saxmad aan la hurayn.
- Goobta ganacsiga ee Midway waa meel ah meelaha ganacsiga iyo deegaankaba ugu fidi-taan badan Twin Cities-ka, iyo meelaha ugu saxmad badan. Dhismaha wadada tariinku waxay keenaysaa in fiditaanka la wadi karo.
- Aagga wadada University Avenue waa meesha fursadda ugu fiican u leh in ay noqoto meel dib u dhis magaalo lagu sameeyo ee ku taal Twin Cities-ka.

Muxuu ku kacayaa Central Corridor?

- Saadaasha raasumaalka gelaya dhismaha LRT ee Central Corridor waa \$930 million.

Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan la xirii:

Steve Morris, Transit Projects Manager
Ramsey County Regional Railroad Authority
Suite 6560, RCGC-West, 50 West Kellogg Blvd.
St. Paul, MN 55102 ▪ 651-266-2784
Steve.Morris@co.ramsey.mn.us ▪ www.centralcorridor.org

